Godadka xudunta ah, dhexroorkoodu yahay 150mm, ayaa laga daloolinayaa gidaar dibadda ah si ay ugu oggolaato in hawada kulul ay meeshaas ka baxdo. Dabool dibadda ah ayaa lagu rakibay si looga hortago wax kasta oo soo gali kara gurigaaga.

## Balanta aan adiga kaa qaadeyno ayaa waxay tahay:

Marka aan ku soo booqano, waxaan mar walba:

- ✓ Ku dadaali doonaa inaan adiga iyo gurigaagaba ixtiraamno
- ✓ Ku tusi doonaa kaararkeena aqoonsiga
- ✓ Nadiifin doonaa goobta booqasho kasta ka dib
- ✓ Kula soo socodsiin doonaa wixii soo kordha



## Su'aal qabtaa?

1800 519 721 ama

HighRiseCooling@homes.vic.gov.au

Markaad na soo wacdo ama aad iimayl noo soo dirto, xubin ka tirsan kooxdayada ayaa kugu soo warcelin doonta.

Waxaa jira taageero la heli karo si looga caawiyo biilasha tamartaada. Wixii ku saabsan dhimista korontada ka ogow **services.dffh.vic.gov.au/energy**

Waxa kale oo aad ka heli kartaa faa'iidooyinka iyo talooyin ku saabsan qaboojinta gurigaaga markaad booqato **sustainability.vic.gov.au** aadna meesha wax laga raadiyo ku qorto 'Cool your home'.

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Homes Victoria, Maarso 2025. (HV002625).
Waxaa daabacday Finsbury Green, Melbourne Victoria, 3000.

Somali | Soomaali

homes victoria

**Barnaamijka Qaboojiyaha Dabaqyada Dhaadheer**

# Hel qaboojiyahaaga lacag la'aanta ah



VICTORIA State Government

# Waa maxay Barnaamijka Qaboojinta Saraha Dhaadheer?

## Waxaan guryaha ku xireynaa qaboojiye lacag la'aan ah si aad isugu qaboojiso gurigana uu kuugu qaboojiyo xilliyada cimiladu kulushahay.

Cutubka (unit) iyo rakibaadda waa mid lacag la'aan ah waana ikhtiyaari, uma baahnid inaad ka baxdo gurigaaga marka la rakibayo.

Qaboojiyaha cusub waa:

- ✓ Tamarta-hufan
- ✓ Aan shanqadh lahayn
- ✓ Si fudud loogu isticmaali karo remuutka
- ✓ Waxaad awoodi kartaa inaan qolal kala duwan u qaadato *(haddii uu jiro dalool muhiim ah oo u ogolaanaya in hawada kulul ay u baxdo bannaanka)*

Waxaa lagu qiyaasayaa inay **ku kacayso $1.20 maalintii** si aad u isticmaasho qaboojiyaha markay cimiladu kulushahay, taas oo ku salaysan celcelis ahaan **isticmaalka 4 saacadood maalintii** iyo qiimaha korantada marka tijaabada la sameynayo.

# Haddii aad rabto qaboojiyaha

### 1. Qabso ballan

Marka aad hesho warqad, nala socodsii inaad rabto qaboojiyaha adiga oo:

- Nagula hadlaya goobaha aan wax kusoo badhigayno
- Iimayl: HighRiseCooling@homes.vic.gov.au
- Taleefanka: 1800 519 721

### 2. Kormeerka shaqada ka hor

Kooxdayadu waxay kugula kulmi doonaan gurigaaga. Waxaan kormeeri doonaa meesha aan ku rakibi doono qaboojiyahaaga cusub, waxaanan kuu sharixi doonaa habka wax loo rakibayo.

### 3. Qodista godadka muhiimka ee xudunta u ah - maaha guryaha oo dhan

Haddii aanad hore u lahayn godadka xudunta u ah, waa in aanu qaboojiyahaaga cusub uga duleelino meel darbiga.

Waxaad dooran kartaa inaad rabto hal ama laba god oo gurigaaga ah si aad u marba meel u geysato qaboojiyahaaga.

Markaan dhameyno waxaan ka tagi doonaa gurigaaga oo nadiif ah godkana waa la dabooli doonaa.

### 4. Marka la rakibayo qaboojiyaha

Kooxdayadu waxay rakibi doontaa cutubka (unit ka), waxayna ku tusi doonaan sida uu u shaqeynayo waxayna ku siin doonaan wax kooban oo ku hagi doona oo ku saabsan sida ugu fiican ee aad uga faa'iidi karto.

Uma baahnid inaad ka baxdo gurigaaga inta ay socoto hawshan.

### 5. Marka u dambeysa ee wax la eegayo

Waxaan hubin doonaa in nidaamka cusub uu si sax ah u shaqeynayo waxaana kaaga jawaabi doonaa su'aal kasta oo aad qabtid. Waxaan dib ka sameyn doonaa xog-ururin si aan u ogaano ra'yigaaga




Qaboojiyahaaga cusub waa **DeLonghi Pinguino PAC EL112 CST**